Wasaaradda Waxbarashada

Jiheeyaha loogu talagalay Caafimaadka Carruurta iyo Ardayda ee Degmada Växjö

Waa maxay jiheeye?

Jiheeyuhu wuxuu dhigayaa waxyaabaha khuseeya degmada Växjö ee garab socda waxyaabaha u baahan sharciyada iyo xeerarka. Ujeeddadeedu waa in la abuuro caddaalad hawlaha maamulka waxbarashada degmada Växjö si carruurta iyo ardayda loo siiyo fursado isku mid ah iyadoo aan loo eegin goobta kommuunka ee ilmuhu/ardaygu la kulmo. Hadafka Caafimaadka Carruurta iyo Ardaydu waa in jawi waxbarasho oo sida ugu wanaagsan ee ugu macquulsan ah loo abuuro dhammaan carruurta iyo ardayda ku jira hawlaha Degmada Växjö.

! Hanuuninta Hay'adda Bulshada iyo Wakaaladda Waxbarashadu u sameeyeen Caafimaadka Ardayda (2014) ayaa noqonaysaa mid loo arko taageero jiheeyahan loogu talo galay.

* Qoraalkan jiheeyaha halkan waa lagu soo koobay Jiheeyaha oo dhamaystiran waxaad ka helaysaa bogga Intra-netka Wasaaradda Waxbarashada.

Wasaaradda Waxbarashada
Degmada Växjö
telefoon 0470-410 00
www.vaxjo.se

Hawlaha Hay'adda Caafimaadka Carruurta iyo habka ay u shaqeeyaan

(Waxay khusaysaa carruurta 1 sanno ilaa dugsiga Xannaanada 'förskolan')
Daryeelka Caafimaadka Carruurta ee Gobolka Kronoberg ayaa ka mas'uul ah caafimaadka carruurta ee ilaa da'da dugsiga Xannaanada. Laga bilaabo dugsiga Xannaanada waxay Adeegga Caafimaadka Ardayda mas'uuliyaddu ku wareegaysaa qaybta Caafimaadka Ardayda (elevhälsa) ee dugsiga.

Degmada Växjö waxa dugsiyada Xannaanadu isticmaali karaan qayb ka mid ah Caafimaadka Ardayda, tusaale ahaan waxa Bare-takhasusa looga yeedhan karaa waaxda dhexe ee Caafimaadka Ardayda si loo hubiyo indha-indhaynta ay sameeyeen shaqaalaha dugsiga Xannaanadu si markaas kadib loo siiyo hagitaan. Baahiyaha waxa go'aaminaya kooxda caafimaadka carruurta (dhigga kooxda caafimaadka ardayda), agaasimaha dugsiga xannaanaduna, haddii loo baahdo, waa ka la xidhiidhaya waaxda dhexe ee Caafimaadka Ardayda.

Iyadoo uu maamulka dugsiga xannaanadu hoggaaminayo waxa wakiillada kooxda caafimaadka carruurta iyo shaqaalahu wada diyaariyaan qorshe caafimaadka carruurta ah dugsi xannaaneed kasta, halkaas oo caadooyinka, habraacyada iyo mas'uuliyadaha lagu dejiyo iyadoo ku salaysan styrdokument (dukumentiga hageha ah) iyo jiheeyahan.

Dariiqada Shaqada "Tidiga insatser" (Hawlaha Hore)
Dariiqada Shaqada "Farogelinta Hore" waxa ugu horreyntii hadafkeedu yahay da'da yaryar laakiin habka loo abbaarayo wuxuu khuseeya dhammaan aragtida 1 - 20 sano. Farogelinta Hore macnaheedu waa hab shaqo oo dadaal leh oo leh horumarin caafimaad iyo hawlo ka hortag ah. Tani waa in hore loo ogaado oo looga hortago dhibaatooyinka carruurta iyo qoyska oo kor loogu qaado horumar wanaagsan oo guud ahaan carruurta iyo gaar ahaan dadka waxyeello/nuglaan u gaar tahay.

Habkan loo abbaarayo Farogelinta Hore waxaad ka helaysaa Qeybaha oo dhan taas oo macnaheedu yahay diyaar garaw lagu isticmaalayo habka shaqo si loo garto oo looga hortago dhibaatooyinka carruurta iyo qoyska. Habka shaqada waxa ka mid ah hagitaan, hanuunin, talobixin iyo taageero la siinayo qoysaska, carruurta/ardayda, macalimiinta iyo waliba madaxda dugsiga ee khabiirrada laga helo heer waaxeed iyo heer goobeed. Habka loo abbaarayo iyo habka shaqada ee Farogelinta Hore waxa lagu dhigay/qoray qorshaha caafimaadka ee carruurta/ardayda

Hawlaha Caafimaadka Ardayda iyo habka ay u shaqeeyaan

(waxay khuseysaa dugsiga xannaanada ilaa dugsiga sare)
Sharciga Waxbarashada (2010:800) ee la hirgeliyay 1 Juulaay 2011 waxa Caafimaadka Ardayda oo dhamaystiran lagu wada koobay daryeelka caafimaadka ee dugsiga, daryeelka gaarka ah ee ardayga iyo hawlaha waxbarashada gaarka ah. Caafimaadka Ardaydu wuxuu koobayaa hawlaha daaweyn, caafimaad maskax iyo waxbarashada khaaska ah. Hawlaha Caafimaadka Ardaydu waxay taageerayaan horumarka ardayga ee hadafka waxbarashadiisa. Xirfadle kastaba waxa saaran mas'uuliyad uu aqoontiisa gaarka ah ku taageerayo oo la shaqaynayo xirfadlayaasha kale ee ka mid ah Caafimaadka Ardayda, dugsiga iyo wixii dugsiga ka baxsan. Caafimaadka Ardayda oo isku duuban waa in ay helaan ardayda dugsiga barbaarinta, dugsiga hoose, dugsiga hoose ee gaarka ah, dugsiga sare iyo dugsiga sare ee gaarka ah

Sida uu dhigayo Sharciga Waxbarashadu, waa qasab in ay jiraan dhakhtar dugsi, kalkaaliye caafimaad oo dugsi, dhakhtar cilmi-nafsi iyo shaqaale bulsho (kurator) oo qabanaya waxqabadyada caafimaadka, cilmi nafsiga iyo nafsaani-bulsho. Waxa sidoo kale qasab ah inay jiraan shaqaale leh aqoon lagu kabi karo baahida ardayga ee waxbarasho gaar ah.

Caafimaadka Ardayda wuxuu ka shaqeeya horumarinta caafimaadka, ka hortagga, iyo wax ka qabashada oo saddex heer ah; heer urur, heer koox iyo heer shakhsi. Habka horumarinta caafimaadka waxay ujeeddadeedu tahay in la xoojiyo oo la sii wado fayoqabka jidhka, maskaxda iyo bulshada, iyo lagu dhiso kalsoonida iyo kaga qaybgalka shakhsiga ee awooddiisa u gaarka ah.

Shaqada koox ku wajahan ee Caafimaadka Ardayda
Guud ahaan Caafimaadka Ardayda ee hawlaha daaweynta, cilmi nafsiga, nafsaani-bulsho iyo waxbarashada khaaska ah waa in...

… dhinaca shaqada ku wajahan heer kooxeed
• kor loo qaado waxbarashada, horumarka iyo caafimaadka ardayda
• laga hortago caafimaad darrada iyo dhibaatooyin waxbarasho
• la abuuro jawi kor loogu qaadayo barashada, horumarka iyo caafimaadka.

Shaqada koox ku wajahani waxay noqon kartaa in aqoonta Caafimaadka Ardaydu ay ka mid noqon karto koox shaqo ama kooxaha baahida gaarka ah ay wadajir macallimiinta ula qorsheeyaan hawlaha barashada iyo horumarka. Waxay ku saabsanaan kartaa waxyaalaha khuseeya bay'adda ardayda iyo qiyamka dugsiga, sida tusaale ahaan shaqada lagaga hortagayo dhaqanka xadgudubka, waxbarashada ku saabsan tubaakada, khamriga iyo daroogada

kale iyo waxa caafimaad darro keena ee hab-nololeedka la xidhiidha, sinnaanta iyo waxbarashadda jinsiga iyo galmada. Caafimaadka Ardayda waxa saaran mas'uuliyad in ay ilaaliyaan in dugsigu taageero sidii loo abuuri lahaa shuruudo koritaan oo fiican oo ammaan ah. Guud ahaan shaqada koox ku wajahan ee Caafimaadka Ardayda waxa hoggaamiya oo isku dubbarida maamulaha/maareeyaha heer goobeed.

Shaqada shakhsi ku wajahan ee Caafimaadka Ardayda
Guud ahaan Caafimaadka Ardayda ee hawlaha daaweynta, cilmi nafsiga, nafsaani-bulsho iyo waxbarashada khaaska ah waa in...

… ee shaqada shakhsi ku wajahan
- lagu taageero in shakhsi kasta oo arday ah hab loo dhan yahay loo siiyo fursado uu ku horumaro sida suurtogalka ah ee hadafka waxbarashada.
- Laga hor qaado waxyaabaha caqabadaha ku ah waxbarashada, horumarka iyo caafimaadka ardayda
- in la garto oo iyadoo la raacayo hawlgalka maamulaha la baadho sabobaha keena dhibaatooyinka barashada
- in la garto oo la baadho sabobaha keena caafimaad darrada
- lagu taageero xal u helid iyo la qabsiin shakhsi kasta oo arday ah oo u baahan taageero gaar ah.

Shaqada shakhsiga ku wajahani waxay bixisaa fursad kooxda caafimaadka ardayda lagaga helo khubaro takhasus oo kala duwan kuwaasoo oo ku siinaya shuruudo si ballaadhan loogu ogaanayo, loo falanqaynayo oo loo qiimeynayo baahida gaarka ah ee ardayga. Si shaqadan jihaysan loogu bixiyo qaab waxtar leh waxa la isticmaalaa modelka/Qaabdhismeedka bogga soo socda.



Modelku wuxuu u shaqeeya hab marxaladeed, marka tallaabooyinka xalka ah natiijo laga waayo ayaa ugu horreyn baadhitaan dheeraada lagu sameeyaa baahida.

1. Baraha, fasal/bay'ad barasho. Macallinka/hagaha/bareha iyo macallimiinta kale ee wax dhiga ayaa u fiirsanaya calaamadaha haddii arday uu halis ugu jiro in aanu horumarkiisu u socon sida hadafka manhajka waxbarashada ama aanu gaadhayn shuruudaha aqoonta ee ugu yaraan loo baahan yahay. Qiimeynta tacliinta ee aqoonta ardaygu waxay ka bilaabataa waxqabadka shaqo ee ardayga iyo macallinku siduu u fasirto waxqabadka. Waxaana ka mid ah dhammaan qiimeynta aqoonta kala duwan ee la sameeyo si loo ogaado oo loo qiimeeyo aqoonta. Haddii la arko calaamado, dugsiga ayaa si degdeg ah u bixin doona gargaar hagaajin dheeraad ah oo manhajka waxbarashada ee caadiga ah ku kooban, loomana baahna in la qaato go'aan rasmi ah si loo bixiyo sixidda dheeraadka ah. Kartiyaha Caafimaadka Ardaydu waxay halkan buuxin karaan door ka hortag iyo la-talin.

2. Koox shaqo waxay bixiyaan taageero in ay khibraddooda wadajirka ah si dheeraada ugu hagaajiyaan hawlaha taageero kolba baahida ardayga ama siiyaan talooyin ku saabsan qaabayn ka duwan ah oo dheeraad ah.
Waxa la sii xoojinayaa hagaajinta dheeraadka ah - waxay noqon kartaa in la kordhiyo baaxadda iyo xawaaraha hawlaha taageero. Haddii la arko in arday u baahan yahay taageero gaar ah, macalimiinta ama shaqaalaha kale ee dugsiga ayaa ogeysiinaya maamulka dugsiga sida caado ahaan ku qoran qorshaha Caafimaadka Carruurta/Caafimaadka Ardayga. Maamulka dugsiga ayaa xilligaas hubinaya in baahida ilmaha/ardayga si degdeg ah loo baadho iyadoo lala tashanayo Caafimaadka Ardayda.

3. Kooxda Caafimaadka Ardayda Maamulaha ayaa sida sharciga waxbarashada ku dhigan mas'uul ka ah in si degdeg ah baadhitaan loo sameeyo, iyo in wadatashi lala sameeyo Caafimaadka Ardayda, haddii aanay caddayn in aan loo baahnayn. Kooxda Caafimaadka Ardayda, oo uu hoggaaminayo Maamuluhu waxay raacayaan qodobadda ku qoran qorshaha caafimaadka ardayda ee goobta.

Kooxda Caafimaadka Carruurta (förskolan) Maareeyaha xannaano wuxuu la tashanayaa wakiillo ka socda waax/goob kasta si joogto si ay ula socdaan oo la garto horumarka iyo baahida carruurta, si ay u helaan taageerada gaarka ah iyo gargaarka iyo caqabadaha ay u baahan yihiin. Kooxda Caafimaadka Carruurtu, oo uu hoggaaminayo maareeyaha xannaano waxay raacayaan qodobadda ku qoran qorshaha caafimaadka carruurta.

4. Waaxda Dhexe ee Caafimaadka Ardayda Baahida aan ugu horreyn goobtu buuxin karin waxa maamulka dugsigu u gudbinayaan maareeyaha waaxda oo hoggaamiya hawlaha waaxda dhexe ee Caafimaadka Ardayda. Maareeyaha waaxdu waa in uu si degdeg ah u qabanqaabin karaa in kiiska iyo baadhitaannada loo qaybiyo mid ka mid ah qaybaha takhasuska ee waaxda dhexe, sida ku qoran qorshaha waaxda ee waaxda dhexe ee Caafimaadka Ardayda.

5. Maaraynta Hawlaha guud ahaan/ Farogelin dibadeed Maamulka dugsiga, oo la tashanaya Maareeyaha Waaxda ayaa go'aamin kara haddii loo baahan yahay maaraynta hawlaha guud ahaan ama farogelin dibadeed. Maaraynta hawlaha ee guud ahaan waxay noqon karaan;

- Xafiiska Baadhitaanka ee Lumos – Wakhti xadidan ayaa la baadhayaa oo la abbaarayaa baahida ardayga ee aragtida bulsho iyo waxbarasho.
- Resursskola – Bay'ad waxbarasho oo ku habboon ardayda muddo dheer ama gaaban u baahan taageerada aan caadiga ahayn taasoo ardaygu tan u baahan yahay. Hawlgalka Resursskolan waa in uu hab shakhsi ahaaneed loogu suurtogeliyo ardaygu inuu hadafkiisa gaadho.
- Dugsiga xannaanada ee luqadda (Språkförskola) ee carruurta da'doodu tahay 4-5 sano ee caqabad weyn ka haysato hadalka. Carruurtu waxay haystaan boos dugsiyeedka dugsigan 'språkförskolan' kolba simistar. Tan waxa la sameeyaa iyada oo lala kaashanayo Gobolka Kronoberg, goobta qoritaanka ee gobolka Kronoberg.
- Fasallada luqadda ee ardayda caqabad weyn oo hadalka ahi haysto ee dugsiga xannaanada ilaa fasalka 3aad. Carruurtu waxay haystaan boos dugsiyeedka dugsigan fasalka luqadda kolba simistar. Qofka mas'uulka ka ah ayaa boos uga dalbaya maamulaha Lillestadskolan.
- Baraha waxmaqalka ayaa maarayn guud ahaaneed ku shaqeeya isaga oo fadhigiisu yahay waaxda galbeed.

Qorshaha Caafimaadka Ardayda ee Heer Goobeed
Iyadoo uu maamuluhu hoggaaminayo waxa kooxda Caafimaadka Ardayda iyo shaqaaluhu samaynayaan qorshe Caafimaad Arday oo heer dugsideed ah kaas oo lagu qorayo waxyaabaha joogtada ah, habraacyada iyo kala qaybsiga mas'uuliyadaha loogu talo galay shaqada guud iyo ta wadajir ee Caafimaadka Ardayda ee dugsiga iyadoo la raacayo dukumentiga hageha ah ee khuseeya. Qorshaha Caafimaadka Ardayda waa lala socdaa oo la qiimeeyaa sannad kasta, tan oo ah qayb ka mid ah nidaamka shaqo ee tayoda lagu dhowrayo iyo si loo ogaado meelaha horumarin u baahan ee Caafimaadka Ardayda.

Xirfadaha Caafimaadka Ardayda

Hoos waxaa ku qoran warbixin kooban oo ku saabsan xirfadaha loo baahan yahay in laga helo Caafimaadka Ardayda sida uu sharciga waxbarashada dhigayo; dhakhtar dugsi, kalkaaliso caafimaad ee dugsi, dhakhtar cilmi-nafsi, shaqaale bulsho iyo shaqaale khibrad waxbarasho oo khaas ah.

Dhakhtar dugsi Waxa aqoontiisa ka mid ah hawlaha daaweynta ee Caafimaadka Ardayda sida garashada, daaweynta iyo daryeelka waxaanu hubinayaa in daryeelku uu ahaato mid tayo fiican leh oo bukaanka ammaankiisa si sare u suga.

Kalkaalisada caafimaad ee dugsigu waxa aqoonteeda ka mid ah daryeelka caafimaadka, taas oo Caafimaadka Dadweynaha iyo Sayniska Caafimaadka si wadajir ula ah aqoonta aasaaska ah ee xirfadda iyo hawlaha kalkaalisada Waxa aqoontan kalkaalisadu ay ku dabaqaysaa shaqomaalmeedka ay kula kulmayso carruurta iyo ardayda dugsiga iyadoo wada shaqayn dhow ka dhexayso xirfadaha kale.

Dhakhtarka cilmi-nafsiga aqoontiisa waxa ka mid ah aqoonta cilmi-nafsi. Dhakhtarka cilmi-nafsigu wuxuu dugsiga ku taageeraa aqoontiisa cilmi-nafsi iyo waxqabadyada cilmi-nafsi ee u saamaxaya ardaydu inay gaadhaan hadafkooda waxbarasho iyo caafimaad. In la garto, la baadho iyo wax laga qabto dhibaatooyinka caadiga ah ee dhaqan iyo waxbarasho.

Kuratorka Aqoontiisa waxa ka mid ah shaqada bulsho ee dugsi oo wadajir aqoonta cilmiga dhaqanka iyo bulshada iyo sidoo kale hawlaha isbeddelka ee bulsho iyo daaweyn nafsaani u yihiin aasaaska xirfadda iyo shaqada 'kuratorka' ee dugsiga.

Khabiirka waxbarashada khaaska ah aqoontiisa waxa ka mid ah waxbarashada gaarka ah ee la xidhiidha waxbarashada iyo bulshaawinimada carruurta iyo ardayda u baahan taageero gaar ah ama/iyo naafada ah. Khabiirka waxbarashada khaas ah wuxuu sidoo kale leeyahay door kormeeye ahaan oo uu isaga oo ay weheliyaan shaqaale iyo maamul uu ka qaybqaato horumarinta waxbarashada dugsiga.

Macallinka khaaska ah aqoontiisa waxa ka mid ah waxbarashada gaarka ah ee la xidhiidha waxbarashada iyo bulshaawinimada carruurta iyo ardayda u baahan taageero gaar ah ama/iyo naafada ah. Macalinka Khaaska ah wuxuu diiradda saaraa shaqada tooska ah marka ilmaha/ardayga ay haysato dhibaatooyin gaar ah oo ku saabsan barashada gaar ahaaneed ee kobaca luqadda, qoraalka, akhriska ama xisaabta.

Hay'adda

Heer waaxeed

Mid kasta oo ka mid ah lixda waaxood waxay leeyihiin Waax Dhexe oo Caafimaadka Ardayda ah oo hoos timaadda Maareeyaha Waaxda. Waaxda Dhexe ee Caafimaadka Ardayda waxa Maareeyaha Waaxdu sugaa in la helo dhakhtar cilmi-nafsi iyo khabiir maadooyin kala duwan oo ku takhasusay waxbarasho khaas ah. Khabiirka waxbarasho khaas ah waxa sidoo kale la siiyaa dugsiga xannaanada. Maareeyaha waaxdu waa in uu si degdeg ah u qabanqaabin karaa in kiiska iyo baadhitaannada loo qaybiyo mid ka mid ah qaybaha takhasuska ee waaxda dhexe. Iyada oo ku xidhan deegaanka, qaab-dhismeedka dugsiga iyo mas'uuliyadaha maamul ee guud waxa Maareeyaha waaxdu go'aaminayaa xajmiga Waaxdiisa Dhexe ee Caafimaadka Ardayda. Maareeyaha Waaxdu wuxuu mas'uul ka yahay in qorshe heer waaxeed ah la helo (u dhigma Qorshaha Caafimaadka Carruurta/Qorshaha Caafimaadka Ardayga), halkaas oo caadooyinka, habraacyada iyo mas'uuliyadaha lagu dejiyo qaab ku salaysan styrdokument (dukumentiga hageha ah) iyo jiheeyahan.

Maareeyaha Hawlgalka iyo Maareeyaha Waaxdu waxay ka mas'uul yihiin wadashaqaynta waaxaha kala duwan iyo horumariyaha hawlgalka/Maareeyaha Hawlgalka iyadoo la tixraacayo sharciga daryeelka caafimaadka.

Heer Goobeed

Maareeyaha xannaano iyo maamulaha waxa saaran mas'uuliyad carruurta iyo ardayda u baahan taageero gaar ah. Waxay ka mas'uul yihiin qabanqaabinta, hoggaaminta iyo isku dubaridka hawlaha kooxda Caafimaadka Carruurta/Ardayda ee goobta si carruurta/ardayda loo siiyo taageerada baahidooda gaarka ah ku habboon. Goob kasta waxa loo sameeyay kooxda Caafimaadka Carruurta/Ardayda oo sannad walba la qiimeeyo. Heer Goobeed ahaan waxa maamulaha hoos yimaadda kalkaaliso caafimaad oo dugsi, dhakhtar cilmi-nafsi, shaqaale bulsho iyo khabiir waxbarasho khaas ah iyo macallin khaas ah.

Soo saarid: Växjö kommun, utbildningsförvaltningen, 2015-06 • Sawir: Emelie Hellden, Mats Samuelsson

Växjö kommun

Europas grönaste stad

Degmada Växjö
Box 1222
351 12 Växjö
telefoon 0470-410 00
www.vaxjo.se